Xuquuqda Ardayda

# Kadeedka Takoorka

Sharciyada xuquuqda madaniga waxay mamnuuceen takoorka iyo kadeedka takoorka ka jira dugsiyada dadweynaha K-12. Takoorka waa sida aan xaqa ahayn ama sinaan la'aanta loola dhaqmo ama loo kadeedo qof *maxaa yeelay* qofka wuxuu ka tirsan yahay koox, lagu sifeyay sharciga, sida **dabaqadda la badbaadiyo**.

Dabaqadda la badbaadiyo waa koox dad qeybsada sifooyin ka dhexeeyo oo laga badbaadiyo takoorka iyo kadeedka hoos yimaada sharciga federaalkaa iyo gobolka. Kooxahaan waa dabaqaad la badbaadiyo sida hoos timaado sharciga Gobolka Washington:[1]

| | |
|---|---|
| Isirka iyo midabka | Doorashada Jinsiga |
| Asal qaran | Sheegidda jaadka qofka |
| Diinta iyo waxa la aaminsan yahay | Aqoonsiga jaadka qofka |
| Jinsiga | Xaaladda ciidamada ka soo noqda dagaalada ama militariga |
| Itaal darrida | Isticmaalka hoggaaminta eeyga la tababaray ama xoolaha adeegga |

## Kadeedka Takoorka iyo Jawiga Cadaawadda

**Kadeedka Takoorka**

Dugsiyada waa in ay qaadaan talaabooyin oo ardayda looga badbaadiyo kadeedka takoorka. Kadeedka takoorka waxaa lala kulmaa marka dabeecadda:

1. Ku saleysan tahay dabaqadda la badbaadiyo ardayga, **IYO**
2. Culus tahay in ku filan si loo abuuro jawi cadaawad ku dhisan.

Kadeedka takoorka waxay lug ku yeelan kartaa dabeecadda ka dhexeyso ardayda, dabeecadda ka dhexeyso shaqaalaha-iyo-ardayga, iyo dabeecadda ku lug leh dadka soo booqda dugsiga.

**Jawiga Ku Dhisan Cadaawadda**

Kadeedka wuxuu abuuraa jawi ku dhisan cadaawad marka dabeecadda ay aad u darran tahay, meel kasta gasho, ama joogto tahay, taasoo soo koobta awoodda ardayga u leeyahay in uu ka qeybgalo, ama ka fa'iideysto adeegyada dugsiga, hawlaha, ama fursadaha. Jawi ku dhisan cadaawad wuxuu siyaabo badan u saamayn karaa nolosha dugsiga ardayga. Cudurka, murugada ku saabsan tagidda dugsiga, ama hoos u dhaca darajooyinka ama tagidda waxay calaamo u noqon kartaa jawi ku dhisan cadaawad.

**Dabeecadda Kadeedka** waxay qaadan kartaa qaabab badan, sida cago jugleynta, faafinta xanta, caayda, kaftanka liididda, dagaalka jirka, ama dabeecad kale oo ku dhisan cago jugleyn, waxyeelo, ama yasniin. Waxaa lala kulmi karaa kadeedka xattaa haddii aysan jirin rabitaan in waxyeelo la gaarsiiyo ama aysan ku sii jeedin hal shakhsi, balse dabaqad la badbaadiyo. Kadeedka wuxuu kaloo ahaan karaa dhacdo hal mar lala kulmo.

## Kadeedka Jinsiga waa Kadeedka Takoorka

**Kadeedka jinsiga** waa dabeecad aan la rabin ama xariir kacsi ah oo **(1)** u horseeda ardayga in uu aamino in uu ogolaado dabeecadda jinsiga aan la rabin ama xariirka si uu wax u helo, baddal ahaan - tusaale ahaan, darajo ama boos ka tirsan kooxda isboortiga, AMA **(2)** marka dabeecadda si la taaban karto u farageliso shaqada waxbarashada ardayga ama abuurto jawi ku dhisan cadaawad.

[1] Cutubka 28A.642 RCW, http://app.leg.wa.gov/rcw/default.aspx?cite=28A.642. Cutubka 28A.640 RCW, http://apps.leg.wa.gov/rcw/default.aspx?cite=28A.640. Cutubka 49.60 RCW, http://app.leg.wa.gov/rcw/default.aspx?cite=49.60.

# Kadeedka Takoorka

Arday kasta ama shaqaale kasta oo ka tirsan dugsiga wuxuu bar tilmaameed u noqon karaa kadeedka kacsiga, iyadoo aan loo fiirinin jinsiga qofka, rabitaanka kacsiga, aqoonsiga jaadka qofka, ama sheegidda jaadka qofka. Tusaalooyinka kadeedka jinsiga waxaa ka mid ah:

- Cadaadiska la saaro qofka si looga helo axsaanka kacsiga
- Taabashada aan la rabin ee ah nooca kacsiga
- Qeybinta qoraalada, emailada, ama sawirada kacsiga
- Kaftanka kacsiga, xanta, ama faalada lagu baaqo
- Dagaalka, sida kufsiga iyo weerarka kacsiga

Waxaad macluumaad badan oo ku saabsan kadeedka kacsiga, tilmaamaha siyaasadda dagmada iyo dhaqanka, iyo ilaha la xariira ka heli kartaa: www.k12.wa.us/Equity/Districts/SexualHarassment.aspx.

## Cago Jugleynta Waxay Kaloo Ahaan Kartaa Kadeedka Takoorka

Inkastoo dugsiyada laga rabo in ay qaadaan talaabo haddii ardayda soo sheegaan in la gardareysto, sharciyada xuquuqda madaniga waxay ardayda siiyaan badbaadin dheeraad ah oo ka soo horjeedo kadeedka takoorka. Xattaa marka dabeecad xumada ardayga soo gasho kadeedka dugsiga, cabsi gelinta, iyo siyaasadda gardareysiga (HIB), dabeecadda waxay kaloo ahaan kartaa kadeedka takoorka haddii ay ku saleysan tahay dabaqadda la badbaadiyo ee ardayga.

Badanaa, dugsiyada waa in ay qaadaan talaabo dheeraad ah si ay ardayda uga badbaadiyaan noocaan kadeedka, xattaa haddii dabeecadda ay hoos timaado siyaasadda ka soo horjeedo gardaregysiga ee dugsiga ama siyaasadda HIB. Shaqaalaha dugsiga waa in ay baaraan kadeedka takoorka suurtogalka ah - isla marka ay ogadaan, ama ay ogaan karaan - xattaa haddii waalidka ama ardayga uusan soo gudbinin ashtako rasmi ah.

Haddii baaritaanka muujiyo in gardareysiga ku saleysnaa dabaqadda la badbaadiyo ee ardayga iyo abuurtay jawi ku dhisan cadaawad, shaqaalaha waa in ay dhakhso wax uga qabtaan si ay u joojiyaan dabeecadda una soo af jaraaan jawiga ku dhisan cadaawadda. Dugsiga waa in uu hubsado in kadeedka uusan mar kale dhicin.

## Dugsiga Waa in uga Jawaabo Dhakhso iyo Si Wanaagsan

**Shaqaalaha dugsiga waa in ay baaraan** kadeedka takoorka ee suurtogalka ah - isla marka ay ogadaan ama ay tahay in ay ogadaan - xattaa haddii waalidka ama ardayga uusan soo gudbinin ashtako ama uusan weydiisanin in dugsiga uu soo farageliyo. Baaristaan waa in ay ahaato mid tafatiran, waa in ay ahaato xaq, iyo dhexdhexaad. Shaqaalaha dugsiga waxay kaloo u baahan yahiin in ay qaadaan talaabooyin lagu badbaadinaayo ardayda marka loo baahdo, xattaa ka hor inta aan la dhamaystirin baaritaanka.

Haddii baaritaanka muujiyo in dabeecadda kadeedka abuurtay jawi ku dhisan cadaawad, shaqaalaha waa in ay dhakhso joojiyaan dabeecadda iyo soo af jaraan jawiga ku dhisan cadaawadda.

Dugsiga waa in uu:

1. Wax ka qabto waxyeelada kadeedka takoorka ku yeeshay ardayga inta uu ku sugnaa dugsiga, **IYO**
2. Hubsado in dabeecadda takoorka aysan mar kale dhicin.

Dugsiga waa in uu ardayda iyo waalidiinta ka badbaadiyo aar gudashada ardayda kale ama shaqaalaha dugsiga bacdamaa ay arrimo ka soo jeediyeen kadeedka takoorka, soo gudbiyeen ashtako, ama ka qeybgaleen baaritaan.